Sharciga (2009:62) ku saabsan ka hortagga lacag-maydhista iyo maalgalinta argagixisada

# Sababtaa awgeed ayuu bangigu su’aalaha kuu weyddiinayaa

## Waa maxay lacagta la maydhayaa?

Lacagta la maydhaayo waxa weeye marka lacag ka timid dhinaca danbiilayaasha lagu baddalaayo maaliyad si cad loo arki karo. Waa dhacdo caalami ah oo inta badan ka gudubta xuduudaha waddamada. Waxay noqon kartaa lacag ka timid dembiyada maandooriyaha, tahriibinta dadka laga ganacsado, tahriibta, dembiyada cashuurta, dhaca, foojariga, ka ganacsiga hubka iyo wax kale oo badan.

Iyadoo la isticmaalaayo habka bangiga ayaa cidda rabta inay lacag maydho u qarin kartaa sida loo raadraacaayo lacagtu meeshay ka timid ee dembiga ahayd.

Qaabka lacag-maydhistu waxa uu noqon karaa mid aad u adag. Kaliya maaha lacag kaash ah, ee waxa ka mid noqon kara isku xawilidda iyo khidmado kale ee sida internedka iyo telefoonka.

## Sharciga lacagta la maydhaayo

Si looga hortago in bangiyada loo isticmaalo lacag-maydhista ayaa guud ahaan dunidoo dhan loo sameeyey sharciyo. Sharciga Iswiidhan waxa uu ku dhisan yahay tusmada EU-da ee saddexaad, taas oo micnaheedu yahay in dhammaan shirkadaha maaliyadda ee EU-da ay mas’uul ka yihiin ka hortagga lacag-maydhista. Sharciga xataa waxa ku jira shirkadaha iyo xirfadleyda ka baxsan laanta maaliyadda sida xisaabiyayaasha, qareenada, kuwa guryaha iibiya iyo qaar kale oo badan.Sharci la mid ah ayaa ka yaala maalgalinta argagixisada.

## Bangigu waa ku qasab inuu su’aalo weyddiiyo

Sida saxa sharciga lacag-maydhista micnahiisu waa in bangigu uu qiimeyn ku sameeyo khatarta in loo isticmaalaayo lacag-maydhis. Sharcigu waxa uu shuruud adag saarayaa in bangigu uu aqoon wanaagsan u leeyahay macaamiishiisa iyo arrimaha bangigooda. Bangigu waa inuu fahmo ujeeddada xidhidhka ganacsiga iyo xataa dhaqdhaqaaqa macaamiisha ee kala duwan.

Macluumaadka macaamiisha ee uu bangigu helaayo waxa loo hayn doonaa si sir ah iyadoo ay ka mid tahay sirhaynta bangiga.

### Ujeedada dhaqdhaqaaqa

Markaa doonayso inaad lacag ku shubto ama dhaqdhaqaaq kale waa inaad su’aalo ka jawaabto oo aad tusto aqoonsi shaqeynaaya marka shaqaalaha bangiga uu kaa dalbado. Waxay noqon kartaa dhaqdhaqaaq uu bangigu u arko midaan caadi ahayn ama aanu bangigu fahmin ujeeddadiisa.

Shaqaalaha bangiga ayay mas’’uuliyad ka saaran tahay inuu ka dib ku weyddiiyo dhaqdhaqaaqa iyo waxa lacagta lagu isticmaalaayo iwm.

Marmarka qaarkood waxa uu bangigu u baahan yahay inuu arko heshiis, risiidh, biil ama caddeymo kale oo taageeraaya warbixintaada.

### Haddaad tahay macaamiil cusub

Bangiga waxay mas’uuliyad ka saaran tahay inuu hubsado aqoonsiga qofka doonaaya inuu noqdo macamiil cusub, tusaale ahaan, markaad doonayso inaad furto koonto, lacag ku kaydsato saami ama caymiska hawlgabka. Si loo hirgaliyo khidmada la dalbadey ayuu shaqaalaha bangigu ku weyddiin doonaa su’aalo dheeraad ah si uu adiga kaaga helo aqoon dheeraad ah.

### Haddaad hore u tahay macaamiisha bangiga

Xataa haddii aad tahay macaamiil hada waa inaad haddii lagaa dalbado tusi kartaa aqoonis shaqeynaaya iyadood dhiibi karto macluumaadka dhammaystiraaya. Waxay tusaale ahaan noqon kartaa markaad doonayso inaad sameyso dhaqdhaqaaq ama aad doonayso khidmad cusub.

### Shakhsiyaad darajo siyaasadeed soo hayey

Bangigu waa in uu ogaadaa haddii aad siyaasi soo ahayd, oo aad darajo siyaasadeed oo muhiim ah ka soo haysey ama weli ka hayso dowlad dal kale ama urur caalami ah. Bangigu waa in uu sidoo kale ogaadaa dadka macaamiisha ah oo qaraabo la ah qofka darajada siyaasadeed soo hayey ama la soo shaqeeyey siyaasiga.

### Macaamiisha shirkadaha

Haddaad matalyso shirkad waa inaad tusto aqoonsi shaqeynaaya iyo inaad xaq u leedahay inaad shirkadda matasho. Waxa intaa dheeraad ah inuu bangigu eego cidda shirkadda ku leh in ka badan boqolkiiba 25 iyo inay cidda go’aan saameyn ku leh shirkadda.




Sidoo kale waa inaad u diyaar garowdo inad ka jawaabto waxqabdka shirkada, hab-dhiskeeda iyo sida loo isticmaali doono khidmada bangiga.

## Marmarka qaarkood maaha inuu bangigu khidmada sameeyo

Haddii aanad tusi karin aqoonsi shaqeynaaya ama aanad dhiibin sharraxaad lagu qanco oo ku saabsan waxa khidmad laguugu sameyn, ma sameynaayo bangigu khidmada aad rabtey. Haddii aan sharciga la raacin waxa la ciqaabi shaqaalaha markaa bangiga ka shaqeynaaya. Iyadoo markaa bangiga uu kormeeraha maaliyaddu ganaaxi doono.

Haddii bangiga looga shakiyo lacag-maydhis waxa loo soo sheegi kormeeraha maaliyadda, kaas oo qayb gaar ah ka ah Ciidanka Booliiska danbiyada ee qaranka.

## Macluumaad ku saabsan lacagbixinta

Marka laga soo bilaabo 2008 waxa shaqeynaaya sharci ku saabsan macluumaadka la xidhiidhsan lacagbixinta, EG-xeer-dejinta ee ku saabsan lacagbixinta. Sida ku dhigan xeerkaas waa in aad mar kasta macluumaadka aqoosigaaga lagaa reebaa markaa kaash ku shubayso iyo, lacagbixinta. Bangiga waxay mas’uuliyad ka saaran tahay inuu macluumaadkaa dalbado oo uu keydsado.

## Macluumaad dheeraad ah

Bangigu wuxuu bixinayaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan ee su’aalaha ka imaan kara sharciga lacag-maydhista.

Macluumaad dheerad ah oo ku saabsan waxa sharcigu ka kooban yahay iyo micnahiisa waxaa laga helaaya:

Svenska Bankföreningen
www.bankforeningen.se
Teléfono: 08 – 453 44 00

Finansinspektionen
www.fi.se
Teléfono: 08–408 980 00